

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #10

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeer

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

**OAR 333-150-0000,
CUTUBKA 3-304.15**

(A) Haddii la isticmaalayo, galoofisyada halka mar la isticmaalo ayaa loo baahan yahay in loo isticmaalo hal shaqo oo keliya sida ka shaqaynta cunto u diyaarsan in la cuno ama cuntada xaya-waanka ee cayriinka ah, ee aan loo isticmaalin ujeedo kale, lana tuuro marka uu waxyeeloobo ama uu ciidoobo, ama marka hakad ku yimaado howsha.^F

(E) U isticmaalidda galoofisyada latex-ka ah adeegga goobta cuntada waa la mamnuucay.

SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Galoofisyada loo isticmaalo taabashada cuntada diyaarka u ah in la cuno waxaa la gu qeexaa "maacuun" waana in ay buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay ee la xiriira samaynta, dayactirka wanaagsan, nadiifinta, iyo kaydinta maacuunta.

Jeermisyada waxaa loo qaadi karaa cuntada ayada oo laga qaadayo maacuunta lagu kaydiyay oogo aan la nadiifin jeermiskana aan laga dilin. Waxaa sidoo kale gudbin kara isticmaaleyaasha ama shaqaalaha si toos ah, ama si aan toos ahayn ayaka oo kasoo qaadaa alaabta miiska saaran ama weelka cuntada oo la isticmaalay.

Qaar kamid ah jeermisyada ilma-aragtada ah waxay ku noolaadaan jirka banaankiisa muddo aad u dheer. Cuntada sida tooska ah ama aan tooska ahayn u taabata oogooyinka aan nadiifka ahayn aanna la jeermisdilin ayaa mas'uul ka ah wasakhowga noocaas ah.

Isticmaalka Galoofisyada ee Wanaagsan

Galoofisyadu waxay gacan ka gaysan karaan in cuntadu ahaato mid badqabta ayada oo difaac ka dhex samaynaysa gacmaha iyo cuntada. Laakiin haddii aan si sax ah loo isticmaalin, waxay wasakhayn karaan cuntada sida gacmaha wasakhda ah oo kale.

Ku tababar dhammaan shaqaalaha cuntada in ay gacmahooda dhaqdaan kahor inta aysan gacmaha gashan galoofisyada iyo marka ay mid cusub ku badalanayaan. Si aad galoofisyada iskaga saarto, qabo gadaal soona siib ilaa faraha. Ka fogow taabashada qayb kale oo galoofiska kamid ah.

Xaqiiji in galoofisyadu si sax ah kuu le'eg yihiin. Cabirka galoofisku waa u muhiim badqabka iyo raaxada. Ka dooro cabirka saxda ah laga bilaabo mid yar ilaa mid aad u weyn. Galoofisyada aadka u weyn gacmaha kuma sii jirayaan kuwa aadka u yaryarna si fudud ayay ku dilaacayaan ama ku go'ayaan.

Marka aad soo iibsanaayo galoofisyada halka mar la isticmaalo, xaqiiji in ay ka samaysan yihiin waxyaabaha heerka cuntada ah. Galoofisyada ka samaysan latex waa ka mamnuuc u isticmaalidda adeegga cuntada.

Waa in aad galoofisyada iska badashaa:

- Isla markaaba marka ay ciidoobaan ama dilaacaan
- Kahor inta aadan shaqo kale bilaabin
- Ugu yaraan afartii saac ee kasta inta lagu jiro isticmaalkooda oo aan kala joogsi lahayn
- Kadib marka aad qabato wax laga sameeyay xayawaan oo cayriin ah iyo
- Kahor inta aadan qaban cuntada la kariyay ama in la cuno u diyaarsan

Marna ha dhaqin oo dib ha u isticmaalin galoofisyada halka mar la isticmaalo.

Galoofisyada waa in ay ahaadaan kuwo shaqo u gaar ah - loo isticmaalo hal shaqo oo cunto diyaarin ah lana iska siibo.



Galoofisyadu waa mid kamid ah khiyaarada BADAN ee looga hortagi karo ku taabashada gacmaha banaan cuntada diyaarka u ah cunista

Wixii macluumaad oo tababar ah oo ku saabsan isticmaalka galoofiska wanaagsan eeg:
<http://www.foodhandler.com/training.cfm>